# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

## DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

## لولاية ارض بونت الصومال

**Sanadka 9-aad. Garowe 15. August. 2007** **Lam. 8**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدةالشهرية

***Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA

## Qeybta Koowaad

**Sharci**

## Qeybta labaad

**Xeer**

**Waxba ma leh**

## Qeybta Saddexaad

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

***Sharci Lr. 12. ee 11/08/2007, kuna saabsan Qaanuunka Qorshaha 5-sano ee Puntland.*** Boga 155-186

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

Xafiiska Madaxweynaha

**Office of the President**

**Sharci Lr.12 ee 11/08/2007, kuna saabsan Sharciga Qorshaha 5-sano ee Puntland.**

**Madaxweynuhu**

| | | |
|---|---|---|
| **Markuu arkay** | : | **Dastuurka DGPL qodobkiisa 54-aad faqradiisa 14-aad.** |
| **Markuu arkay** | : | **Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/088/2007 ee 31/07/2007.** |
| **Markuu Garowsaday** | : | **Ansixinta Sharcigan ee Golaha Wakiilada.** |

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharcigan soo socda:-**

**<u>Qodobka 1-aad</u>**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen sida kor ku cad qaanuunka Qorshaha 5-sano ee Puntand.

**<u>Qodobka 2-aad</u>**

Nuqulada asalka ah waa la kaydinayaa..

**<u>Qodobka 3-aad</u>**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta uu Faafinta Rasmga ah ee Dowlada ku soo baxo, kaasoo kamid noqonaya qawaaniinta Dawlada, cidkastana waa jib ayey ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Wabillaahi Towfiiq**

**Mudane Maxmuud Muuse Xirsi**

**Madaxweynaha Dowlada**

**DAWLAD G. PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**PUNTLAND STATE**
**OF SOMALIA**

Golaha Wakiillada

Representative Council

## Xafiiska Guddoomiyaha

*Ref:-* XGGW/DGPL/ **88** /2007

Date:- **31/07/2007**

Garoowe

Ku:- Madaxweynaha DGPL

Ujeeddo:- **Ansixinta Qorshaha 5-ta sano ee Puntland**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DGPL |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Golaha Xukuumadda ee July/07/2007 kuna saabsan **Qorshaha 5-ta sano ee Puntland** |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahidda loo qabo **Qorshaha 5-ta sano ee Puntland** |
| MARKUU DHEGEYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada DGPL |
| MARKUU ARKAY:- | Ansixinta Golaha Wakiillada DGPL |

**Wuxuu Guddoomiyey:-**

Ansixinta Qorshaha 5-ta sano ee Puntland

**Wabillaahi Towfiiq**

**Axmed Cali Xaashi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DGPL**

GOLAHA WAKIILLADA EE DGPL
PUNTLAND
PUNTLAND REPRESENTATIVE COUNCIL

156

# QORSHAHA SHANTA SANO EE PUNTLAND

## DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND

### GAROOWE, DECEMBER 2006

Goboladda Dawlad Goboleedka Puntland (DGP) waxaa waligeed haystay dhibaatooyin siyaasadeed iyo dhaqan-dhaqaale, maamuladii kala dambeeyay ee qarnigii labaatanaadna (Ingiriis, Talyaani, iyo maamuladii soomaaliyeed ee kala duwanaa) uma ay qoondeyn wax mashaariic horumarineed ah oo la taaban karo iyadoo dhaqaalihii ummadda badankiisu iyo mashaariicdii horumarineed ku koobnayd Caasummadda iyo inta u dhowdhow, gobolada Puntland waligeed loo aqoon jiray **"gaari waa"**.

Markii ay dhacday Dowladdii dhexe ee fadhigeedu ahaa Muqdisho waxaa faraha ka baxay sharcigii iyo kala dambayntii iyadoo ay bilowdeen burcad hubaysan oo ka dhacay meelo badan oo Soomaaliya ah, gaar ahaan koonfurta. Arrintu si kastaba aha ahaatee, markii la asaasay DGP 1998 waxaana u baryay dadka reer Puntland waa cusub. Waxaa la sameeyay hay'adihii dawladda oo kuna dhisan caddaalad, sinaan iyo awood qaybsi taas oo ka duwan siyaasadda goosashada ee Somaliland iyo dagaal oogayaasha Gobolada Konfureed. DGP waxa ay aaminsan tahay oo ku dadaalaysaa siyaadda midnimo Soomaaliyeed, waxayna go'aansatay in ay u halganto raadinta qaranimadii ummadda Soomaaliyeed, waxa ayna u gogol xaartay Dowladda Federaalka ku Meel-gaarka ah ee ku dhisan nidaamka awoodda baahsan.

DGP waxa ay dooratay in ay sii waddo isbadelka siyaasadeed, dhaqaale iyo wadada horumarka bulshada inkastoo ay haleeleen abaaro soo noqnoqonaya, musiibooyin dabiici ah, dad badan oo soo barakacay, iyo qaxooti badan oo dawladaha deriska ah ka yimid. Dhismaha hay'adaha dawladda ka sokow, waxaa lagu guulaystay adkaynta nabadgelyada iyo xasiloonida. In kasta oo dhaqaalaha iyo nabadgelyada DGP uu dhaammo meelo badan oo Soomaaliya ah, haddana waxaa hortaagan horumarka oo gaabinaya, kaabayaasha dhaqaalaha oo liita, iyo hay'adaha dawladda oo heerka addeegeedu hooseeyo xarfad yari darteed.

Hadaba, iyadoo qayb ka ah qorshaha horumarineed ee dawladda ayaa Wasaaradda Qorshaynta iyo Xiriirka Caalamiga ah guda gashay diyaarinta Qorshaha Shanta sano ee Puntland kaas oo hagaya hanaanka horumarineed ee DGP.

Dhismaha qoraalka Qorshaha Shanta Sano ee DGP waxa loo diyaariyay sidaan:

- Cutubka 1aad waxa uu noqonayaa hordhaca qorshahan
- Cutubka 2aad waxa uu ka hadlayaa Dawlad wanaagga
- Cutubka 3aad waxa uu soo bandhigayaa ammaanka iyo garsoorka
- Cutubka 4aad waxaa lagu eegayaa dhaqaalaha DGP
- Cutubka 5aad waxa uu sharxayaa wax soosaarka
- Cutubka 6aad waxa uu ka hadlayaa adeegyada bulshada
- Cutubka 7aad waxa uu soo bandhigayaa kaabayaasha haqaalaha
- Cutubka 8aad waxa uu la xiriiraa hubinta iyo qiimaynta qorshahan

## QAYBTA 1AAD
## CUTUBKA 1AAD

**Arar Guud**

### 1.1 Dulmarka aragtida dhaqan-dhaqaale

Dawlad Goboleedka Puntland (DGP) ee Soomaaliya waxaa la asaasay Agoosto 1998, waxaana ay ku guuleysatay adkaynta Nabadgelyada iyo Xasiloonida taas oo suurtagelisay dhismaha hay'adihii dawladda, adeegyadii bulshada, ururo bulsho oo xoog leh, iyo ganacsi xor ah oo kobcaya. Tirada dadka ku nool Puntland oo lagu qiyaasay 2.4 milyan, 65% waxa ay ku nooshahay miyiga. Nolosha dadka ku dhaqan DGP ee Soomaaliya waxa ay ku tiirsan tahay Xoolo dhaqashada, Beeraha, gaar ahaan Xabkaha iyo Faleenka, iyo kalluumaysiga. Waxaa la qiyaasaa in xoolo dhoofintu keento 80% dhaqalaha dibadda ka soo gala DGP iyo 40% wax soosaarka gudaha (GDP)[1]. Dhaqaalaha DGP ee Soomaaliya waxaa uu aad ugu xiran yahay xoolo dhoofinta taas oo aad ugu nuguloon isbedellada xagga daaqa iyo xagga cimilada (roob yarida iyo dabaylaha). Awoodda xoola qaadka dhulku aad bay u hoosaysaa xaalufka iyo abaaraha soo noqnoqanaya darteed. Xawaaladaha ay soo diraan qurba-joogta gobolka u dhalatay waxa ay qayb wayn kaga jirtaa dhaqaalaha qoysaska iyadoo isla mar ahaantaasna qayb ka ah maalgelinta ganacsiga yaryar iyo waliba helitaanka adeegyada bulshada.

Nolosha magaalooyinka oo tan miyiga ka saraysa darteed waxa ay u suurtagelinaysaa helitaanka adeegyada bulshada iyadoo dadka badankiisu uu ku noolyahay miyiga oo ay adag tahay in ay gaaraan adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka maadaama aysan u jihaysnayn dadka reer guuraaga ah. Boqolkiiba 45 dakhliga qoysasku waxa uu ka yimaada magaalooyinka la deggan yahay, inta soo hartayna meelaha miyiga ah ayuu ka soo baxaa. Inta u badan ee dakhligaas waxaa lagu soo saaraa iskii u shaqaysi, mushaharooyin shaqaale, xawilaadda qurba-jooga, kirooyin, iyadoo inta soo hartayna kaalmooyin kala duwan ku timaaddo. Waxaa hay'ada UNDP cilmi-baaris ku ogaatay in Gobollada ku guulaystay sugitaanka nabadgelyada iyo xasiloonida uu aad u kobcay dhaqaalahoodu xagga korodhka dakhliga qofka iyo hoos u dhaca saboolnimada[2] labadaba.

Qorshaha Caalamiga ah ee 2000 (MDG)[3] waxaa weeye in nus la gaarsiiyo saboolnimada aadka u daran ee dadka helaya $1 wax ka yar maalintii, waxaana la isticmaalayaa tirada guud ee saboolnimada soomaaliya ee ahayd (1990) 43.2% in hoos loo dhigo illaa 21.6% sannadka 2015. Waxaa kaloo taas garab socota kororka magaalooyinka (degsiimada) oo aad u siyaadaysa oo hadda in badan oo ka mid ah bulshada reer Puntland ay ku nool yihiin magaalooyinka waawayn ee Boosaaso, Qardho, Garoowe, Gaalkacayo, Laas-Caanood, Buuhoodle, iyo Baran. Taas waxa ay keentay soo hagaagidda dhaqaale ka dib markii dad badan ka soo barakaceen colaaddii dhacday 1991 oo ahaa ganacsatadii iyo xirfadlaydii kuwaas oo degey gobollada Puntland. Tusaale ahaan magaalada Boosaaso waxaa dadka ku nool ahaayeen 1991 ilaa 10,000 qof iyadoo maanta lagu qiyaaso 200,000-300,000[4].

---

[1] GDP: Gross domestic product
[2] UNDP and World Bank 2003
[3] MDG Millennium development goal
[4] Hay'adaha iyo DGP waa ku kala duwan yihiin tirada dadka magaalooyinka

Horumarkaan waxaa qayb wayn kaga jira ganacsiga xorta oo maalgelin xoog leh sameeyay iyo shaqo abuur, taasina waxa ay qayb wayn ka qaadatay nabadgelyada iyo xasiloonida gobolka.

Laakiin maadaama dhaqaalaha gobolka xooggiisu ku xiran yahay xoolo dhaqashada iyo dhoofintooda, uuna tartan badani ka jiro soo dejinta iyo gediska waxa uu ka dhigayaa dhaqaalaha mid u nugul masiibooyinka, kuwaas oo raadkoodu ka imaanayo dibada iyo gudahaba. Taasi waxa ay hoos u dhigaysaa koboca dhaqalaha, waxa ayna yaraynaysaa in ay helaan fursado dhaqaale degaanada kordhaya ee gobolka iyadoo isla markaasna kor u qaadaysa shaqo la'aanta iyo saboolnimada, gaar ahaan meelaha miyiga ah iyo reer guuraaga. Sidaas daraadeed, waxaa lama huraan ah in ilo badan loo abuuro dhaqaalaha oo aan xoolaha keliya lagu koobin si loo yareeyo u nuglaanta isbeddellada degdegga ah oo la ballaariyo saldhigyada dhaqaalaha kale; sida kalluumaysiga, soo saarka iyo ka ganacsiga xabkaha iyo faleenka, iyo warshadaynta, iyadoo lala hormarinayo adeegyada ganacsi.

## 1.2 Caqabaadka (taxadiyaadka) waaweyn ee horumarka hortaagan

Si farta loogu fiiqo caqbaadka hortaagan horumarka DGP ee Soomaaliya, waxaana lagama maarmaan ah in la caddeeyo in ay jiraan turaanturooyin badan oo gaabis ka dhigaya arrimaha bulshada, siyaasadda iyo horumarka dhaqaalaha ee gobolka. Arrimahaa waxaa ugu horreeya dhismaha hay'adaha dawladda iyo isbeddellada loo baahan yahay in lagu horumariyo maamul-wanaagga kuwaas oo shuruud u ah helitaanka dawlad-wanaag[5]. Waxaa kaloo hortaagan DGP ee Soomaaliya in ay abuurto jawi caafimaad qaba oo horumar suurtagelin kara iyadoo la imanaysa siyaasado habboon iyo istiraajiyado habaysan.

Waxaa kaloo caqabad weyn ah isticmaalka **qaadka** oo sannad walba dibadda uga saara gobolka lacag adag oo dhan $20 malyuun oo Doolar taas oo wax badan dheer dakhliga dawladda[6]. **Qaadku** oo ka mid ah mukhaadaraadka waxa uu burburburiyaa dhismaha qoyska, wax soosaarka qofkana hoos ayuu u dhigaa isagoo caafimaadka wax yeelaya, isla markaasna ka leexinaya dakhligii yaraa ee qoyska maalgelintii dhaqaale iyo bulsho.

Waxyaalaha kale ee weli mugdigu ku jiro waxaa ka mid ah nidaamka fadaraalka oo aan wali lagu heshiin oo keeni kara in awoodda goboleed ee Puntland hadda haysato in uu ka soo saaro mid dhammaanteed hoos timaada tan dhexe, arrintaas oo keeni karta dib u harid dambe oo ku timaada gobolka.

Waxaa DGP ee Soomaaliya soo wajahday burbur dhanka degaanka ah iyo saboolnimo iyo tamar darro ay keeneen abaaraha soo noqnoqonaya, xaalufka dhulka, ku guul daraysi in loo helo kaalmo caalami ah iyo maalgelin. Dhibaatooyinka waaweyn waxaa ka mid ah abaaraha xilli-guurka ku imaanaya khayraadka dabiiciga ah oo si aan qorshaysnaynu dhaca iyo xaalufka daran ee ay keentay dhuxusha iyadoo ay weheliso xeerar iyo shuruuc la'aan lagu xakamaynayo dhibaatooyinkaas taagan.

---

5 UNDP waxaa ay ku tilmaantaa in dawlad wanaaga loo arko hawlaha siyaasadda, awoodda maamulka ee lagy maaraynayo hawlaha dawladda heerarkeeda kala duwan.
6 UNDP, ILO & IP 2005

Waxaa kaloo gobolladdaan soo degay dad badan oo ka soo barakacay shaqaaqooyinkii dhacay 1991dii iyo meelaha aan weli xasiloonayn ee Soomaaliya. Dadkaas in badan oo ka mid ahi waxa ay ku nool yihiin nolol adag oo degaan iyo daryeel la'aan ah. Waxaa macluumaadka DGP ee Soomaaliya tilmaamayaan in shantii qofba uu qof yahay mid soo barakacay. Intaas waxaa dheer qaxooti farabadan oo ka imanaya dalka Itoobiya oo ku sugan nolo xun. DGP ee Soomaaliya waxa ay ka walaacsan tahay awoodda gobolku ku maarayn karo degaanka dadkaas. Waxa ay ku talinaysaa in dadkaasi dib ugu noqdaan meelihii ay ka yimaadeen ama loo helo cid kale oo awoodda dejintooda.

### 1.3 Himilada Fog (Vision) ee Puntland iyo ahdaafta lagu gaarayo

Himilada fog ee Qorshaha Shanta Sano oo DGP ee Soomaaliya waa in la helo:

**"Dawlad Goboleed xoog leh oo ammaankeedu sugan yahay oo ka tirsan nidaamka Fadaraalka ah ee Soomaaliya ilaalinaysana diinta Islaamka iyo dhaqanka soo jireenka ah isla markaasna horumarinaysa garaadka ummmadeed, dhowraysa degaanka, ugana faa'iidaysanaysa khayraadka dabiiciga ah si siman."**

Vision

**"A strong and secure Puntland State within the Somali federal system preserving its Islamic and cultural heritage, developing human resources, preserving the environment and exploiting natural resources equitably"**

Ujeeddada DGP ee Soomaaliya u samaynayso qorshahan waa in la dhaqaajiyo hannaanka horumarka si kor loogu qaado heerka nolosha, lana helo fursado dhaqaale oo cusub oo lagu kordhiya hantida muwaadinka. Si loo loo kobciyo dhaqaale aan horumarsanayn waxaa lagama maarmaan ah in loo isticmaalo khayraad bulshadu u heli karto si habboon. Dhaqaale aan horumarsanayn waxaa had iyo jeer laga helaa awood dad oo aan laga wada faa'iidaysan iyo khayraad dabiici ah oo aan la manaafacaadsan.

Haddaba, si loo qorsheeyo horumar dhaqaale waa in la diyaariyo jawi siyaasadeed iyo maamul oo bulshadu heshiis ku tahay, waana tan keentay in lagu guulaysto in wada tashiga qorshahaan ay ka qayb qaataan inta ugu badan ee daneeyayaasha (stakeholders) hawshaan.

**Waddooyinka (strategies) lagu gaarayo qorshaha (PFYDP)[7]:**

- Tayaynta shaqaalaha dawladda iyo hay'adaha kale si loo helo adeegyada wakhtigoodii
- Horumarinta maalgelinta bani'aadamka si kor loogu qaado wax soosaarka
- Diyaarinta jawi caafimaad qaba oo horumar iyo koboc ku samayn kara ganacsiga gaarka ah
- Xoojinta siyaasadaha iyo qaab isbeddel si habboon loogu isticmaalayo dadka iyo khayraadka dabiiciga ah si aan wax u dhimayn bay'ada iyo degaanka.



[7] PFYDP: Puntland Five Year Development Plan (Qorshaha Shanta Sano ee Puntland)

## 1.4 Qaabka

Si loo caddeeyo ujeedooyinka, mudnaanta iyo farsamooyinka qorshaha ee DGP ee Soomaaliya waxaa lagama maarmaan ah in laga hadlo gaaritanka ujeeddooyinka waawayn, wax soosaar sare, hawl-gelinta dhammaan awoodda dhaqaalaha, iyo gaaritanka sinnaan dhaqaalaha iyo garsoor bulsho.

Maadaama sannadaha hore ee qorshaha aan dhinacyo badan laga wada hawlgeli Karin, waxaa muhiim ah in mudnaan la kala siiyo hadafyada la hiigsanayo. Waxaa lagama maarmaan ah in sannadaha hore ee qorshaha in la xoojiyo xoolaha, kalluumaysiga iyo beeraha.

Inkastoo aan sannadaha hore xoogga saarayno wax soosaarka oo inta yare e soo hartay aysan dabooli karin baahinta adeegyada bulsho, waa in bulshada la tusaa ahmiyadda waxbarashada, daryeelka caafimaadka, iyo tababarada xirfadeed.

Ganacsigu isagoo adeegsanya qiimaha xiriir ee caynadaha wax soosaarka (factors of production) ayuu khayraadka la haysto u qaybiyaa qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha. Laakiin arrimaha caamka ah daa'iman qiimuhu ma aha kan wax lagu qaybinayo. Sidaas oo ay tahay, waxaa lagama maarmaan ah in haddana la hubiyo kharashka la gelayo iyo waxa soo baxaya. Qorshaha Shanta Sano ee Puntland waxa uu u arkaa ganacsiga gaar ah in uu yahay dhaqaajiyaha koboca dhaqaale, kordhinta dakhliga, isla mar ahaantaasna hoos u dhigaya saboolnimada. Qorshuhu waxa uu tilmaamayaa in la kordhiyo shirkadaha yaryar iyo kuwa heerka dhexe ah ee wax soosaarka iyo farshaxanka kuwaas oo adeegsada khayraadka dabiiciga ah, daboolana suuqyada maxaliga ah, isla markaasna shaqo abuura, yareeyana saboolnimada.

# CUTUB 2AAD
# DAWLAD WANAAGGA IYO HAY'ADAHA

*Himilada horumarineed ee waqtiga fog*: In la hiigsado hagaajinta dawladnimada, daahfurka xisaabedd iyo xisaabtanka isla markaasna loo hawlgalo waxhagaajin iyadoo loo marayo horumarinta iyo kor u qaadidda waxqabadka hay'adaha si loo abuuro jawi suurta gelinkara koritaan dedeg ee dhaqaale oo ay qayb ka yihiin daneeyayaashu.

## 2.1 Hordhac iyo xaalad

Ka dib markuu dhacay dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya, waxaa burburay hay'adihii dawliga ahaa. Kaabayaashii dhaqaalaha ee aasaasiga ahaa ee ay dawladdu ku tiirsanaan lahayd gebi ahaanba wuu burbursan yahay, isla markaasna waxaa aad u hooseeya xirfadda aqooneed ee ay leyihiin shaqaalaha dawladda. Si loo gaaro himilada fog ee la hiigsanayo, waxaa lagama maarmaan ah in kor loo qaado maamulka dawliga ah. Daneeyayaashu waxay qabaan in nabadgelyada, dib u heshiisiinta iyo dawladwanaaggu ay shardi u yihiin xasiloonida iyo shaqaynta hay'adaha dawladda. Si loo abuuro kalsoonida gudaha iyo tan caalamka, waxaa jirta baahi loo qabo in la xoojiyo hay'adaha ku shaqo leh demoqraadiyaynta iyo kala dambaynta si loo helo nabadgelyo waarta iyo dib u heshiisiin.

## 2.2 Xaaladda Hay'adaha Dawladda

Sannadkii 1998 ayaa waxaa shir isugu yimi isimada, siyaasiyiinta, ururrada bulshada iyo aqoonyahannada kuwaas oo ka kala yimi gobollada, waxayna doorteen Gole Shacab kaas oo ansixiyey dastuur cusub. Dastuurka hadda lagu dhaqmo wuxuu goluhu ansixiyey 1dii Luulyo, 2001. Dastuurkan cusubi wuxuu golaha awood u siinayaa in ay ansixiyaan shuruucda guud, miisaaniyadda sannadka iyo shuruucda gaarka ah ee la xiriira meelmarinta xeerarka dawliga ah.

## 2.3 Demoqraadiyeynta

Dawlad Goboeedka Puntland waxay ku talo jirtaa in ay ku tallaabsato habka doorashada xorta ee axsaabta badan, waxayna eegaysaa suurtagalnimada habka saddexda xisbi. Doorashada madaxweynha iyo golaha shacabka waxaa la qorsheeyey in ay dhacaan 2008/2009. Si kastaba ha ahaatee, weli lama dhisin guddi qabanqaabo doorasho oo madaxbannaan.

Qodobada mudnaanta leh ee Demodraadiyeynta

- Dhisidda iyo horumarinta awoodda guddi doorasho oo xor ah
- Diyaarinta qaab-sharciyeedka habka axsaabta badan
- Abaabulidda iyo wacyi gelinta bulshada ee fahamka codbixinta iyo doorashada
- Qabanqaabada doorashada madaxweynaha iyo golaha shacabka iyadoo ay dhinac socoto cod u qaadidda dastuurka
- Xoojinta habka baahinta maamulka ee hadda socota

## 2.4 Maamulka iyo Dawlad-wanaagga

Madaxweynaha ayaa maamula Dawlad Goboleedka Puntland, dawladduna waxay ka koobantahay saddex qaybood oo kala ah: maamulka kore ee fulinta, maamulka gobollada iyo maamulka degmooyinka. Waxaa kaloo jira golaha shacabka oo ka

kooban 66 xildhibaan oo shantii sanoba mar la doorto. Golaha shacabku ma helin ilaa hadda taageero dhaqaale oo xiriir ah oo uu ku horumariyo awooddiisa wax qabad ee la xiriira gobollada iyo degmooyinka ay wkiilka ka yihiin. Shaqaalaha dawladdu ma aha oo keliya lafdhabarta maamulka iyo horumarinta ee waa dhisayaalka woodaha hay'adaha dawaladda. Waxaa jirta baahi loo qabo ballaarinta maamulka dawaldda si loo kordhiyo waxqabadka iyo daahfurka xisaabeed ee dawladda. Maamulka dawladdu wuxuu ka koobanyahay 14 wasaaradood oo mid waliba leedahay wasiir iyo mid ama laba wasiir ku-xigeen. Waxaa lagu dadaalay in la qeexo hawlqabadka wasaaradaha lana cayimo qaabdhismeedkooda. Soo jeedintaasi waxay u baahantahay hirgelin. Wasaarad kasta ilaa hadda iyada ayaa iska leh hawl hoosaadkeeda. Tani waxay keentay in ay bataan waaxyaha wasaardaha iyo shaqaalaha aan hawl muuqata qaban.

Wasaaradda Shaqada, Dhallinyarada iyo Isboortiga ayaa mas'uul ka ah danaha shaqaalaha dawladda. Si kastab ha u dhacdee, waqtigan xaadirka ah wasaaraddu awood uma leh in ay qorshayso oo fuliso siyaasadda laga leeyahay arrintan. Ma laha saamayn ay ku fuliso xeerarka shaqadaalaha. Dawladdu waxay soo bandhigtay in la abuuro Waaxda Horumarinta Shaqaalaha ( human resource developmentent) oo hoos imaanaysa wasaaradda shaqada, dhallinyarda iyo Isboortiga.

Hantidhawarka guud waa hay'ad dawli ah oo madaxbannaan kuna hoos shaqaynaysa xafiiska mdaxweynaha. Hantidhawraha guud waa in uu baaritaan ku sarneeyaa hay'adaha dawaladda wixii ka soo baxana u gudbiyaa golaha shacabka sida loo maamulay hantida ummadda. Intii la abuuray ka dib wuxuu diiwaangeliyey wax aan badnayn oo loo gudbiyey golaha shacabka iyo xafiiska madaxweynaha, laakiin wax la taaban karo lagama qaban qaladaadkii la soo gudbiyey.

Ma jiraan tirokoob sheegaysa inta dumarku ka yihiin shaqaalaha dawladda, laakiin waxaa cad in ay tiradoodu aad u yarthay marka loo eego ragga, isla markaasna ay qabtaan shaqooyinka ugu hooseeya. Waxaa aad u dhib badan in aad aragto dumar jagooyin sare haya ama loo magacaabay jago sare ee siyaasadeed.

Qodobada mudnaanta leh ee maamulka dawliga ah

- Qaabaynta iyo hirgelinta dib u habaynta shaqaalaha dawladda
- Kor u qaadidda wax qabadka shaqaalaha dawladda
- Xoojinta daahfurka ( transparency) xisaabaadka iyo xisaab wanaagga si loo helo kalsoonida shacabka

## 2.5 Baahinta Maamulka Dawladda iyo kan Dawladaha Hoose

Dawlad Goboleedka Puntland waxay dhowaan ansixisay barnaamijka hirgelinta baahinta maamulka. Tani waxay ku caddahay Xeerka Dawladaha Hoose ee soo baxay 2003 kaasoo oggolaanaya in awoodda la siiyo degmooyinka si ay u yeeshaan awood ay ku qaadi karaan canshuur, isla markaasna ku bixin karaan kharaj. Waxaa hadda golaha deegaanka u soo magacaaba si wadatashi ah oday-dhaqameedyada, waxaana lagu guulaystey in degmooyin farabadan loo dhiso gole deegaan. Puntland waxay ka koobantahay 7 gobol iyo 33 degmo. Waxaa jira 2 degmo oo aan weli laga ansixin golaha shacabka.

### 2.5.1 Baahinta awoodda dawladda iyo dawladaha hoose

Dawlad Goboleedka Puntland waxay ku tallaabsatay baahinta maamulka ee gobollada, degmooyinka iyo golaha deegaanka. Ilaa xad waxay dawladdu mas'uul ka tahay adeegga biyaha, waxbarashada, caafimaadka, guryaha, kala dambaynta iyo nabdgelyada.

### 2.5.2 La dagaalanka xatooyada iyo hirgelinta hanidhawrka

Dawlad bilow ah sida Puntland, waxaan ka marnayn musuqmaasuqa iyo laaluushka taasoo waxyeello weyn gaarsiin karta dhaqaalaha. Siyaasadda dawladdu waxa weeye in ay ay awood gaar ah siiso hantidhawrka.

Qodobada mudnaanta leh ee baahinta maamulka guud iyo kan dawladaha hoose

- Dhammaystirka baahinta adeegga iyadoo laga qaybgelinayo maamulka dawladaha hoose
- Xaqiijinta in dumarku qayb ka qaataan siyaasadda
- Xoojinta awoodda siyaasadeed ee baahinta siyaasadda canshuuraha
- Dhisidda shuruucda dawladda iyo maamulka dawladaha hoose si loo qeexo hawsha dhismaha hay'adaha ee heerarka kala duwan
- Horumarinta iyo isla qaadashada lagu gudbinayo adeeg, lagu kordhinayo la bahoobidda hay'adaha gaarka loo leeyahay si loo horumariyo u adeegga danyarta.
- Maalgelinta hantiyeed si golaha deegaanku u awoodo in uu qabsado hawshiisa

2.6 Doorka Bulshada Rayadka ah iyo Warfaafinta ee Dawladwanaagga

Bulshada rayadka ahi waxay door muhiim oo isugu jira mid bulsho iyo mid siyaasadeed ku leeyihiin Puntland. Inkasta oo ay ku cusubyihiin bulshada, haddana waxay door muhiim ah ka qaataan nabadda, dib u heshiisiinta iyo horumarka. Ururrada aan dawliga ahayn waxay ku badan yihiin magaalooyinka waaweyn, kamana jiraan wax adeeg ah oo loo fidiyo dadka deggan tuulooyinka iyo miyiga. Wadaadadu waxay iyaguna door muhiin ah ku leeyihiin fidinta mucaawinada, waxbarashada iyo caddaaladda.

Xiriirka horumarineed ee ka dhexeeya dawladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay wuxuu muhiim u yahay helitaanka dawladwanaagga.

Siyaasadda guud ee dawladda ee la xiriirta doorka hay'adaha dawldda iyo kuwa gaarka ah waxaa loo kala saari karaa saddex mudnaanood oo kala ah:

1) Dhiirrigelinta hay'adaha gaarka loo leeyahay iyadoo la abuurayo jawi suurtagelinaya

2) Dhiirrigelinta wax wadaqabsiga ka dhexaysa hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay gaar ahaan kuwa dhismaha, biyaha, jidadka, dekedaha iyo madaarrada.

3) Dhiirrigelinta iyo taageeridda hawlaha ay gacanta ku hayso bulshado.

Qodobada mudnaanta leh ee ururrada bulshada iyo warfaafinta

- Dhiirrigelinta xeerar ay ku dhaqmaan ururada bulshadu si ay u helaan aqoonsi una yeeshaan daahfur xisaabeed iyo xisaabwanaag

- Xoogsaaridda horumarinta buslshada iyadoo lagu garayo xog isweydaarsi
- Eegidda danaha dadweynaha iyo wacyigelinta bulshada iyadoo looga digayo baahinta wixii keeni kara fadqalalo iyo dagaal
- Dhiirrigelinta wadashaqayn dhexmarta maamulk dawladda iyo ururrada bulshada
- Taageeridda kor u qaadidda aqooneed ee dadka ka shaqeeya warbaahinta
- Dejinta qaabka siyaasadda war isgaarsiinta iyo xogta
- Dhiirrrigelinta in dumarku ka qaybqaataan saxaafadda iyo war isgaarsiinta

**2.7 Soojeedin waxa la filyo in ay ka soo baxaan qorshaha shanta sano**

- Dawladwanaag, nabadgelyo iyo xasillooni
- Hirgelidda demoqraadiyadda iyo baahint maamulka
- Jawi keeni kara koror dhaqaale

**2.8 Soojeedin waxa la filayo in ay ka dhashaan qorshaha shanta sano**

- Isha/asalka is afgaranwaaga ( gudaha iyo dibdda ) oo si dhab ah loog hadlay
- Qaabka iyo tallaabooyinka doorashada ee nidaamka demoqraadiyadda oo la diyaariyey
- Habkii loo mari lahaa baahinta maamulka oo la dhammaystiray, lana ansixiyey
- Dib u habaynta iyo kor u qaadidda aqoonta shaqaalaha dawladda oo la dhammaystiray
- Nidaamkii hagi lahaa ururrada iyo warbaahinta oo la abyey

## CUTUBKA 3AAD
## AMNIGA IYO ARIMAHA GARSOORKA

Himilada fog ee qorshaha shanta sano ka leeyahay amniga iyo garsoorka waa:

*"Dib u soo celinta sharciga iyo kala danbeynta, kor u qaadida amniga guud ee bulshada, yareynta iyo ka hortaga danbiyada, ka hortaga iyo xalinta isku dhac bulsheedka, hub ka dhigista shacabka iyadoo loo ololeynayo bulsho anshax leh oo ku dhaqanta shareecadda islaamka"*

### I. Hordhac

Muhiimadda iyo caqabadaha maamulka cusub ee Puntland xal inuu u helo laga doonayao waxaa ka mid ah amni la'aanta iyo saboolnimadda ka dhalatay dagaalkii sokeeye.

Laga bilaabo xiligii la aasaasay maamul goboleedka Puntland 1998 ilaa maanta oo la joogo wuxuu maamulka ku guuleystay ilaa xad in nabadda la ilaaliyo, amniga la sugo, lana soo celiyo sareynta sharciga iyadoo la abuurayo jawi xasiloon oo horumarin lagu sameyn karo. *Waxaase wali loo baahan yahay in la horumariyo lana dhowro nabadgelyada la gaaray iyo dhworidda xuquuqda aadanaha.*

Iyadoo ay sidaas tahay, maamul goboleedka Puntland wuxuu dareensan yahay in soo kabasho bulshadeed, soo kabasho dhaqaale iyo yareynta saboolnimada ay u baahan yihiin abuurid jawi horumarineed iyo mid maalgashi.

Waxaa mudan in la sheego in maamulka uu had iyo jeer ka shaqeeyo amniga iyo nabadda gudaha iyo dibadda, dib u heshiisiinta, hirgelinta nidaam maamul oo ku saleysan xisaabtan iyo feydnaan (shafaafiyad). Sidoo kale maamulka wuxuu tixgelin siiyaa siyaasadda gobolka, sida muranka iyo khilaafka dowladaha deriska u dhaxeeya iyo adkeynta dowladda dhexe ee federaalka ah.

Khilaafaadka iyo isku dhaca bulshada ku nool gobollada Puntland waxaa sababa hab maamulka kheyraadka dabiiciga ee dhulka. Dacwadaha ugu badan ee la horkeeno maxkamadaha Puntland waxey quseeyaan isku qabsi dhul (bagcad, biyo, caws, daaq iyo kayn), sababtuna waxay tahay wixii nidaam ama caddeymo ahaa ee dadka kala hagi lahaa ayaa ku baaba'ay dagaalkii sokeeye ee soomaaliya.

Xal u helidda khilaafaadkaas waxaa hortaagan:

- *Saboolnimada baahday oo dadku ilaha dhaqaale ku dirirayaan*
- *Kalsooni daro loo hayo maamul dhexe oo yimaada, waxaana sababay dayacii gobolladan kala kulmeen maamulladii hore*
- *Khilaafaadka aan weli la xallin*
- *Mileeshooyinka hubaysan oo dagaal kicin kara xilligii ay doonaan*

*Qodobada Mudnaanta leh ee Khilaaf Go'aaminta iyo Dibuheshiisiinta*:

- *Horumarinta geedisocodka nabadda iyadoo la tixgelinayo ka soo qeyb galka daneeyayaasha (odayaasha, culimada, haweenka, aqoonyahannadda iyo dadka laga tirada badan yahay)*
- *Bilabid dib-u-heshiisiin u dhaxeysa Puntland iyo Somaliland iyadoo la dhiiri gelinayo wadahadal labada bulshood dhexmara*
- *Golaha shacabka inay ansixiyaan qaanuunka hagidda iyo qorsheynta dhulka, dhexdhexaadinta khilaafkiisa iyo qaybintiisa.*
- *Adkayn maamulka gobolka xag siyaasadeed iyo xag maamul si loo gaaro horumar dhaqaale.*

## II. Garsoorka iyo Saraynta Qaanuunka

Xilligii la aasaasay maamul goboleedka Puntland 1998, waxaa lagu dhawaaqay toddoba maxkamadood oo ka shaqeynaya toddobada gobol ee Puntland, waxaa kaloo la aasaasay maxkamad sare oo ku taal xarunta maamul goboleedka Puntland ee garoowe.

Qaanuunka la raaco ee Puntland wuxuu ka kooban yahay a) *Xeer, b)Shareeca iyo c)Nidaam Cilmaani.* Saddexdaas nidaam waxey u shaqeeyaan hab is feersocod ah, midkastana wuxuu nidaamiyaa arrimo kala duwan.

Waxaa jira daldaloolo fara badan oo xagga garsoorka ah, sida baahi loo qabo in maxkamadaha la dayactiro, in garsoorayaasha iyo kaaliyayaasha maxkamaddaha la tababaro, qawaaniinta in loo sameeyo xudduud dhuleed, mushaarka shaqaalaha la nidaamiyo lana bixiyo si musuqmaasuq uusan u dhicin.

***Qodobada Mudnaanta leh ee Garsoorka iyo Saraynta Qaanuunka:***

- *In la caddeeyo kaalimaha kala duwan ee sharciyada iyo xiriirka ka dhaxeeya*
- *In la balaariyo awoodda iyo baaxadda maxkamadaha, iyadoo la dhaafinayo intay joogaan hadda oo ah 10% dhulka Puntland*
- *In qaanuunka laga dhigo mid leh dhaqan xuquuqda aadanaha dhowra, iyadoo la shaacinayo heshiisyada xuquuq dhowrista ee caalamiga ah.*
- *In la cilmiyeeyo habka garsoorka iyo caddaaladda*

***Natiijada la soo jeediyey inay ka soo baxdo qorshaha shanta sano:***

- *Sumcadda Ismaamulka Puntland oo kor loo qaado, bulshadana la wacyi geliyo qaanuunkuna wax hago*
- *Abuurid jawi horumarineed, iskaashi iyo dhiirigelin*
- *Qaanuunka dhulka oo la dhaqan geliyo*
- *In la Cilmiyeeyo sharciyadda kala duwan .*
- *Maxkamadaha oo gaara dhulka aan maxkamadaha lahayn*

### III. Amniga iyo Hirgelinta Sharciga

Maamul goboleedka Puntland wuxuu leeyahy ciidan boolis oo ka kooban ciidankii hore ee booliska soomaaliyeed, ciidamadii militeriga iyo maleeshiyooyin beeleedyadii hore. Ciidanka booliska wuxuu hoos yimaadaa Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo amniga, oo ah wasaaradda u xilsaaran ilaalinta amniga gudaha iyo soo celinta sharciga iyo kala danbeynta.

Caqabado farabadan ayaa jira oo wiiqa habsami u shaqeynta booliska; sida caddadkooda oo yar, intooda badan oo aan tababarneyn iyo qalabkii u saamixi lahaa iney howshooda si buuxda u gutaan oo ka maqan. Hadaba cilladahaas oo dhammi waxay sababaan in bulshada had iyo jeer ay ku tiirsanaadaan xal u helida khilaafaadkooda hab qabiil.

Haddaba maamulka isagoo ka amba qaadaya caqabadahaas aan kor ku soo sheegnay, iyo culeyska ka saaran ilaalinta iyo waardiyeynta xeebaha Puntland ee dhererkoodu yahay 1,640 km ayaa waxey qorsheysatay in taageero iyo gacansiin ay ka raadiso dowladaha aynu saaxiibka nahay, hey'adaha caalamiga iyo bulshada caalamka.

Puntland waxaa laga dhisay dugsi lagu tababaro booliska, kaas oo wax badan buuxinaya baahida dowladda, dugsigaan wuxuu kaloo u furan yahay gobollada soomaaliya oo idil

***Natiijada la soo jeediyey inay ka soo baxdo qorshaha shanta sano:***

- *In la helo amni iyo dhul nabdoon*
- *Caddaalad bulshadeed oo la gaaro*
- *In la dhiso boolis qalabeysan waxtarna leh oo hadhow kamid noqda booliska qaranka soomaaliyeed*
- *In la xaqiijiyo ka mid ahaanshaha dumarka ee booliska ilaa 15%*
- *In la dhowro nafta iyo hantida muwaadiniinta*

### IV. Hub ka dhigista, Dib u habaynta iyo Jihaynta

Himilada fog ee qorshaha shanta sano:

"Ciidamada kala duwan ee isbarbaryaacaya oo hubka laga dhigo, jihayn qaran la sameeyo iyadoo lagu salaynayo iskaashi, ka qaybgal ballaaran iyo kalsooni abuurid si qaanuuni ah"

<u>**Hordhac**</u>

Waxaa lagu qiyaasaa ilaa 800,000 oo qori fudud inay ku yaacsan yihiin gacmaha shacabka reer Puntland. Dagaalkii sokeeye wuxuu abuuray maleeshiyooyin qabiil oo fara badan oo ka kooban ciidan hore iyo shibil. Dowlad goboleedka Puntland markii la aasaasay waxaa Puntland ku sugnaa ilaa 15,000 oo maleeshiyo beeleed, ilaa 3,000 oo maleeshiyo ayaa iskood ugu laabtay noloshii shibilka, in kale oo badanna waxay galeen shaqaalaha maamulka qaybihiisa kala duwan.

Sidaa awgeed, amni qoto dheer oo la gaaro wuxuu ku xiran yahay in maleeshiyooyinka faraha badan ee maamulka ku haya culeys dhaqaale amnigana qatarta ku haya la qaabeeyo oo shibilka iyo maleeshiyooyinka hubka laga dhigo, kadibna la jiheeyo.

Howshaan oo ay waddo Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Amniga waxey dowladda u leedahay muhiimad gaar ah maadaama ay khuseyso amniga iyo dhaqaalaha gobolka. Shaqadeedana aad bay u socotaa, ilaa xad waxaa la diyaariyey qaabkii barnaamijka loo fulin lahaa iyadoo taageero laga helayo hey'ada UNDP.

***Natiijada la soo jeediyey iney ka soo baxdo qorshaha shanta sano ee ku aadan DDR ka:***

- *In qaybta amniga dibu habeyntiisa la dhammeeyo*
- *In maleeshiyooyinka qeybna shibilnimo dib loogu celiyo qeybna ciidanka qalabkasida lagu daro*
- *In la dhimo ciidamada qalabka sida 60% si culeyska dhaqaale u yaraado*

### V. Miina baarista

Himilada fog ee qorshaha shanta sano:

"Xaqiijinta in dhammaan ismaamul goboleedka Puntland la miina saaro gobolkana uu noqdo mid nadiif ka ah khatarta miinada mustaqbalka"

<u>Hordhac</u>

Dhibaatooyinka miinada iyo walxaha qarxa waxay ka hareen tobannaankii sano ee dagallada iyo khilaafaadka saameeyeen gobollada Puntland. Waxaa Puntland laga sameeyey Baaritaan Saameynta Miinada laba qeybood, waxaa hadda dhiman qeybta ugu saameynta badan dhibaatooyinka miinada oo ah Sool, Sanaag iyo Ceyn.

Si loo waajaho khatarta miinooyinka iyo walxaha qarxa ay ku hayaan dhaqdhaqaaqa dadka iyo xoolaha Puntland ayaa ismaamulku wuxuu abuuray xafiis la yiraahdo Barnaamijka Miinasaaridda Puntland (Puntland Mine Action Project) oo ay maamusho Qeypta Miinasaarka ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga ee Puntland ayna taageeraan UNDP-EC.

***Natiijada la soo jeediyey iney ka soo baxdo qorshaha shanta sano ku aadan miinasaarka:***

- *Dhulka laga nadiifiyo miinooyinka iyo walxaha qarxa*
- *Badbaadada shacabka oo kor loo qaado*
- *Barnaamijka miinasaarka Puntland oo sidii la rabay howshiisa u guta*
- *In la sameeyo tababaro iyo awood sare u qaadid shaqaalaha barnaamijka miinasaarka*

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.Recapturing of un collected inland taxes (direct, indirect, property)[2] | 31.00 | (8%) 2.5 | 3% 0.93 | 2% 0.62 | 1.5% 0.47 | 1% 0.31 |
| | | | | | | |
| 2.Tansfers (fishery, bilateral grants) fixed rate of 18 Billion[3] | 10.30 | 18 | 18 | 18 | 18 | 18 |
| | | | | | | |
| 3. Development budget[4] (increment of 1.5 Billion per year) | 6.36 | 7.8 | 9.3 | 10.8 | 12.3 | 13.8 |
| **Development Funds Sub Total** | | **28.30** | **28.23** | **29.42** | **30.77** | **31.31** |
| Additional taxes[5] | | 5.40 | 5.40 | 5.40 | 5.40 | 5.40 |
| **B. Development Funds Total Budgetary Sources** | | **33.70 (2.25)** | **33.63 (2.24)** | **34.82 (2.32)** | **36.10 (2.41)** | **36.71 (2.45)** |
| **Development Funds as % of Total Budget** | | **12.51%** | **11.96%** | **11.88%** | **11.74%** | **11.36%** |
| . Diaspora Sectoral Development Project Fund[6] | 11.3 | 11.53 | 11.76 | 11.99 | 12.23 | 12.48 |
| D. Aid/Humanitarian Assistance[7] | 216 | 216 | 1275.00 | 1275.00 | 1275.00 | 1275.00 |
| **Potential Aggregate Development Envelope (B+C+D)** | | **261.23 (17.42)** | **1320.39 (88.03)** | **1321.81 (88.12)** | **1323.33 (88.22)** | **1324.19 (88.28)** |

Saadaalintaa waxaa ka maqan maalgelinta gaar-ahaaneed oo la filaayo inay sii kordhayso taasoo dhalinaysa koboca xag dakhli iyo mid shaqasiinba.

## CUTUBKA 4-AAD IYO 5-AAD
## DHAQAALAHA DAWLAD GOBOLLEEDKA PUNTLAND

### 1. Himilada Waqtiga Fog

Himilada hormarineed ee dadka Dowlad Goboleedka Puntland tiigsanayaan dhinaca ka faa'iideysiga khayraadka dabiiciga ah ayaa waxay ku salaysantahay straateejiyada dhimista faqriga iyo dib-u-dhiska dhaqaalaha. Arrintani waxay qayb ka tahay himilooyinka adduunweynuhu ku doonayo in faqriga jira la dhimo 50% marka la gaaro 2015.

### 2. Saldhigga Waxsoosaarka Puntland

2.1 Dadweynaha Dowlad Goboleedka Puntland waxay nololmaalmeedka ka soo saaraan manaaficaadsiga khayraadka xoolaha, kalluumaysiga iyo beeyada. 60-65% dadweynaha reer Puntland waxay ka qaybqaataan waxsoosaarka xoolaha kaasoo ku biiriya 40% waxsoosaarka dhaqaalaha guud, isla markaana u soo hoya dalka 80% lacagta qalaad. 20% ka soo harana waxaa kaaba dhoofinta kalluumaysiga iyo beeyada. Waxaa kaloo soo kordhaya waxsoosaarka dhinaca miraha beeraha ay ugu wacantahay xirfadda ay la yimaadeen dadka reer Puntland oo ka soo qaxay gobollada koonfureed ee Soomaaliya (firi shaxda 1).

Shaxda 1 – Shaqasiinta Qaybaha Dhaqaale Puntland

| SECTOR | Share Of Employ't | Location Quotient | Classification | Basic Employm't (Estimated) | INTERPRETATION |
|---|---|---|---|---|---|
| Agriculture | 6.4 | 0.18 | LQ < 1 | 0 | The PUNTLAND region is producing far below the output needed to meet local needs |
| Livestock | 51.2 | 1.74 | LQ > 1 | 41,938 | The PUNTLAND region has a larger proportion of its employment in the sector than does the Somali nation |
| Construction | 0.4 | 0.18 | LQ < 1 | 0 | The PUNTLAND region is producing far below the output needed to meet local needs |
| Wage Employment | 8.1 | 1.08 | LQ > 1 | 1,172 | The PUNTLAND region generates about the same proportion of its employment in sector as Somali nation |
| Business/ Trade | 21.3 | 1.10 | LQ > 1 | 3,766 | The PUNTLAND region generates about the same proportion of its employment in sector i as Somali nation |
| Fishing | 9.0 | 7.04 | LQ > 1 | 14,878 | The PUNTLAND region has a |

Nisbada guud ee ka qayb galka heerka tacliinta asaasiga ah waa hoosaysaa. Waxaa hay'addan UNICEF ku war bixisay in nisbada is qortay dugsiyada hoose ay tahay 37.1 boqolkiiba, halka 45 boqolkiiba wiilal ka yihiin kaqayb galka 2001da, waxa la filayaa in uu noqdo wiilasha 54 boqolkiba, gabdhuhuna 50 boqoliiba.

Habka xuddunta u ah, baridda heerka dugsiyada aasaasiga ah waxa uu lamid yahay kan dugsiyada quraanka waxaa qorshaha horumarka qaranku qirayaa, in isu dheelitir la'aanta jinsiga, isu dheelitir la'aanta qaybsiga khayraadka marka loo eego miyiga iyo magaalda ay yihiin caqabadaha jinaaxa waxbarashada hortaagan, hase yeeshee dawladda waxaa ay kasoo hoysay guul la taaban karo.

Tirada ardada sannadkii 1989 oo ahayd 6000 waxaa ay gaareen 71.502 2004-2005. Dugsiyada hoose-dhexe 1989 waxaa ay ahaayeen 70 dugsi waxaana ay gaareen 400 dugsi oo ay 2,511 macalin wax ka dhigto. Fasallada labaad kuwa dhisan waxaa ay gaareen 2000 in ka badan.

Heerka dugsiyada sare carruurta iyo dhalinta ka qayb gashaa aad ayey u yar yihiin qiyaas ahaan 19 boqolkiiba ayaa gaara heerkaas, helitaanka dugsiyada sare waa naadir, tirada dugsiyada sare ee hadda shaqaysaa waa 18, mana haystaan agabka barid iyo barasho iyo tashjiilaad kale oo habboon.
Si kasta oo ay tahay ,haddana dawladda iyo bulshadu wax bay ku kordhiyaan mushaarka barayaasha, yamxeero kasta oo jirta, haddana lama oran karo tirada dugsiyada sare ma kordhin oo halkii horay ay u ahaayeen 6 qur ah hadda waxa ay gaareen 18 dugsi oo ay dhigtaan 4,444 arday taas oo ay gaar ka yihiin ubadka reer miyiga iyo xoolo dhaqatada lagu talo jiro.

Soomaalida qurbo jooga ah dowr wayn bay ka qaateen maalgelinta hawlaha waxbarashada waxa ay wax ka qabteen dhismaha iyo dayactirka dugsiyada iyo machadyada, mushaarka barayaasha, qalabka baridda iyo aaladda, maal gelintaasi inta badan waxay ku jihaysan tahay barashada farsamada iyo xirfadaha iyo heerka jaamacadaha laakiin tababarada farsamada iyo xirfadaha wali uma kobcin si taam ah.

Inkasta oo ay muhiim ugu yihiin horumarka shaqaale xirfad iyo farsamo yaqaan ah, gaar ahaan ugu habboon dhalin yarada dagaalku saameeyey. Hadda waxaa u furan oo shaqeeya 3 jaamacadood, machadka tababarka macalamiinta iyo xarumo farsamo waxaana maal geliya qurbo joogga iyo NGO, dawladda kama helaan kaalmo ka badan dhiirigelin. Kaabayaasha waxbarashadu ma badna ama ma jiraan waxa ayna u baahan yihiin cilmi baaris iyo maal gelin xoog leh (badan).

Dawlad Goboleedka Puntland, waxaa ay qortay labada golena ansixiyeen siyaasadda waxbarashada, siyaasadaas oo u baahan kaalmo xooga si looga guul gaaro yoolka waxbarashada heerka aasaasiga ah oo u furan dhammaan ilmaha meel kasta oo ay joogaan iyo xaalad kasta oo ay ku sugan yihiin (lacag la'aan ah).

## FURAHA MUDNAANTA WAXBARASHADA

- Kor u qaadidda tirada ardada dugsiyada hoose dhexe gasha oo hadda lagu qiyaaso 37 boqolkiiba in la gaarsiiyo 52 boqolkiiba ( 50 boqolkiiba gabdho – 54 wiilal boqolkiiba) marka lagaaro 2011.

Shaxda 2 – Saadaalinta Koboca Shaqasiinta ee Puntland **2003-2012**

**(Upper Case Scenario- 5 Percent Growth Rate)**

| Sector | National Total No.(2002) | Puntland Total No.(2002) | Puntland Share | National Proj. No.(2012) | National Growth To 2012 | Puntland Proj. | Puntland New Jobs |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Agriculture | 742631.6 | 12219.8 | 0.0165 | 1209668.6 | 0.6289 | 19904.7 | 7684.9 |
| Livestock | 615230.9 | 98302.8 | 0.1598 | 1002146.3 | 0.6289 | 160124.8 | 61822.1 |
| Construction | 46827.7 | 780.6 | 0.0167 | 76277.5 | 0.6289 | 1271.4 | 490.9 |
| Wage Employ. | 156456.9 | 15505.6 | 0.0991 | 254851.9 | 0.6289 | 25256.9 | 9751.4 |
| Business/Trade | 405755.7 | 40939.4 | 0.1009 | 660933.2 | 0.6289 | 66686.0 | 25746.6 |
| Others | 127279.8 | 24111.7 | 0.1894 | 207325.4 | 0.6289 | 39275.5 | 15163.7 |
| Total | 2094182.6 | 191859.8 | 0.0916 | 3411202.8 | 0.6289 | 312519.4 | 120659.6 |

Haddiise la saadaaliyo in dhaqaaluhu u kobcayo 2.5% sannad walba ilaa iyo 2012 shaqasiintu waxay kordhaysaa ilaa qiyaastii 54,000 oo shaaqaale dheeri ah oo keliya sida ku cad shaxda 3.

Shaxda 3 - Saadaalinta Koboca Shaqasiinta ee Puntland **2003-2012**
**LOWER CASE SCENARIO- 2.5 PERCENT GROWTH RATE**

| Sector | National Total No.(2002) | Puntland Total No.(2002) | Puntland Share | National Proj. No.(2012) | National Growth To 2012 | Puntland Proj. | Puntland New Jobs |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Agriculture | 742631.6 | 12219.8 | 0.0165 | 950631.2 | 0.2801 | 15642.3 | 3422.6 |
| Livestock | 615230.9 | 98302.8 | 0.1598 | 787547.5 | 0.2801 | 125835.8 | 27533.1 |
| Construction | 46827.7 | 780.6 | 0.0167 | 59943.5 | 0.2801 | 999.2 | 218.6 |
| Wage Emplyt. | 156456.9 | 15505.6 | 0.0991 | 200278.1 | 0.2801 | 19848.4 | 4342.9 |
| Business/Trade | 405755.7 | 40939.4 | 0.1009 | 519401.6 | 0.2801 | 52405.9 | 11466.5 |
| Others | 127279.8 | 24111.7 | 0.1894 | 162929.0 | 0.2801 | 30865.1 | 6753.3 |
| Total | 2094182.6 | 191859.8 | 0.0916 | 2680730.8 | 0.2801 | 245596.8 | 53737.0 |

3.2 Ilaha Maalgelinta la saadaalinaayo

Waxaa la saadaaliyay in ilaha maalgelineed laga filayo inay ka qaybqaataan fulinta qorshaha shanta sano ee ka kala yimaada qaybaha dhaqaale ee Puntland, qurbajoogga reer Puntland, iyo mucaawinooyinka dibadda sida ku cad shaxda 4

Shaxda 4 – Saadaalinta Maalgelinta Qorshaha 2007-2011

(So.Sh billion; US $ in millions in bracket)

| | Base year 2006 | 2007 | 2008 | 2009 | 2010 | 2011 |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **A. Budget Total: 2007-2011**[1] | **252.2 (16.81)** | **269.3 (17.95)** | **281.23 (18.75)** | **293.2 (19.55)** | **307.49 (20.5)** | **32 (21.** |
| Additional Resource Mobilization (ARM) | | | | | | |

Tusaalaha waa sida lahaanshaha gaarka ah iyo kan la wada leeyahay u wada shaqeeyaan oo u bixiyaan xal macne badan ah. Taas oo dhakhtaradu ka helaan dakhli qanciya. Laakiin, dhibta jirta waxa ay tahay inta ku shaqaysa laysan la'aan, farmashiyooyinka oo aan habaysneen oo lagu fasiri karo tabakaayooyin caadi ah. Dhammaan tusayaasha (Tusayaasha – Bukaanka-dhakhtarka-kaaliyayaasha waa qaylo dhaan)

### 6.3.1. HIV/AIDS

Yoolka horumarka fog ee 2000 sano; waa joojinta iyo weecinta faafinta HIV/AIDS marka la gaaro 2015.

Yoolasha horumarka 2000 sano waa yaraynta dhacida HIV/AIDS marka la gaaro 2015.

In kasta oo nisbada jiritaanku hooseeyo (1-2% boqolkiiba) haddana waxaa jira khatar soo kordheysa oo muddo yar ku faafta. Khatarta muuqata waxaa ku jira anshaxa yar iyo STD baahsan. Badashada dhaqdhaqaaqa bulshada iyo qaxootiga gudaha iyo colaadda gobollada, abaarta iyo Tsunami dhibaatadeeda, caddadka soo badanaya ee qurbaha ka soo noqonaya, isdaba-marka shaqaalaha iyo qaxootiga Gobollada deriska ka soo galaya dalka Puntland.

### 6.3.2 Qaaxada

Qaaxadu aad ayey ugu badan tahay Soomaaliya, waana jiro aad ugu xun caafimaadka. Sida lagu qiyaasay kunkii qofba 324 qof baa qaba. Sannad kastana qaaxadu waxa ay saameysaa 21,000 oo qof. Waxa la ogaaday in da'da 15-44 ay fidiyaan.

### 6.3.2. Duumada

Duumadu waa ku yar tahay Puntland, marka loo eego gobollada kale ee Soomaaliya, cidda ugu nugul ee ay haleeshaa waa ilmaha reer guuraaga, waxaana sababa tabaryarida caafimaadka dhallaankaa.

## 6.4. Horumarka Arrimaha qoyska iyo haweenka

Yoolasha fog ee qorshaha horumarka shanta sano ee horumarka arrimaha qoyska iyo haweenka waa u sinnaanta dumarka fursadda horumarka nolashu, xushmadda iyo ciribtirka isticmaalka faquuqa si kasta oo ay ku iman karto. Tayaynta haweenka si ay biiro fiican ugu yeeshaan dhismaha iyo horumarka dalka.

Yoolasha kunka sano; waa kor u qaadidda sinnaanta jinsiga iyo tayeynta haweenka.

Dastuurka Puntland waxaa si cad uga muuqda xuquuqda haweenka gaar ahaan qodobka 18 iyo 23 waxayna caddeynayaan, xuquuqda, badbaadinta iyo in haweenku raga ula siman yihiin shaqada. Dawladdu waa in ay ku dhiiri gelisaa sharci dejinta xuquuqda dumarka.

## CUTUBKA 6-AAD
## JINAAXA BULSHADA.

6.1. Jinaaxa bulshadu door weyn oo ka duwan kan dakhliga ayuu ka cayaaraa arrimaha saboolnimada, dib u dhiska iyo nabad galyada ka jirta Puntland ayaa fure u ah fursadaha horumarka iyo soo kabashada jinaaxa adeegga bulshada.

Dawladu waxa ay meel marisay siyaasadaha adeegga bulshada cunsurrada ugu muhiimsan ee aasaaska u ah caafimaadka, waxbarashada, dawladdu waxay si deg deg ah u hagaajisay xaaladaha biyaha iyo nadaafada guud si kasta oo ay tahay, hadana miisaaniyadda loo qoondeeyey bulshada oo ay ku jiraan inta u nugul bulshada aad ayey u yartahay. Waliba, hadaba miisaaniyadda yar waxaa sabab u ah maal galinta bulshada caalamka, Qurba jooggayaasha iyo biirada shacabka hantida gaarka ah oo aan arrimihiisu isku dubo ridnayn oo u baahan waxa uu u baahan baaritaan lagu ogaado xaaladdooda. Inta xukuummadda dhexe sida gaabiska ah ugu gudbineyso degmooyinka qorshaha, kharajka iyo adeegga waxaa meesha ka maqnaanaya agabka muhiimka ah iyo awoodda wax qabad, jinaaxa bulshadu qorshaha horumarinta shanta waxaa kaga soo aaday fulinta qaybaha ay kamid yihiin, waxbarashada, caafimaadka, haweenka iyo arrimaha qoyska, dhallinyarada iyo ispoortig, bulshada maskab jabka.

### 6.2. Jinaaxa Waxbarashada.

Yoolasha muddada fog ee qorshaha horumarinta shanta sano (QHSHS).
Jinaaxa waxbarashada : Waxaa uu horumarinta ku biirinayaa bulshada mintid ku ah kaydinta iyo in xoog la saaro soomaaliya, qiyamka dhaqanka islaamka iyo cadooyinka, koriinada awoodda maangal ku fekerka, figrad cad, isku kalsoonaan, ku dhiiri galinta bulshada barashada akhris/qoris iyo sentiifikada, teknoolojiyada, aqoonta maamulka, inta xiriirka la leh yoolasha labada kun sano, guud ahaan waa : Guul ka gaaridda waxbarashada, xaqiijinta in 2015ka ubadku meel kasta oo ay joogaan gabdho iyo wiilalba ay awood u yeeshaan ka qalin jabinta dugsiyada aasaasiga ah halka ay ka ahayd 2005, la ciribtiro u sinaan la'aanta wiilasha iyo gabdhaha waxbarashada dugsiyada hoose, dhammaan heerarka kale ee waxbarashada lagu dabar gooyo 2015.

6.3. DGPL waxaa ay u baahan tahay in barnaamijka waxbarashada asaasigaa ah uu kobciyo (dhiiri geliyo) koritaan dhaqaale, bulsho, baraare, degenaansho. Punt land waxaa ay ku talaabsatay dadaal gaar ah oo ay ku muujisay sida ay mintid ugu tahay jinaaxa waxbarashada, dastuurka DGPL, qodobka 22.3 waxaa uu si cad u qeexayaa in waxbarashada aasaasiga ah ka kooban tahay, dugsiyada quraanka, waxbarashada aasaasiga ah, dugsiyada hoose dhexe iyo kuwa sare, waxbarashada dadban, tarbiyadda iyo madadaalada. Waxbarashada haweenka waa masuuliyadda dawladda hirgelinta siyaasadda waxbarashada midaynta manhajka. Waxaa dawladdu ku mintidaysaa waxbarasho u furan dhammaan ilmaha meel kasta oo ay joogaan.

Nisbada akhris / qoris waxaa lagu qiyaasaa 28.5 lama tixgelin tiro koobta a waxbarashada dadban iyo waxbarashada quraanka oo aan xogta tiro koobtooda lahayn.

## CUTUBKA 7AAD
## *HAWLAHA GUUD IYO KAABAYAASH ADHAQAALAHA*

Yoolka qorshaha waqtiga dheer ee shanta sano ee soo socota dhinaca horumarinta ee qaybtan waa: dhismaha iyo xaqiijinta kaabayaal dhaqaale kuwasoo hanandoona helitaanka biyo nadiif ah, nadaafada magaalooyinka, deegaaan ilaashan, halitaanka tamar xor ah iyo hoy ku filan dadka

Xidhiidh ka uu la leeyahey MDG ama (millennium development goals 1990-2015) waa dhimista saboolnimada baahdey,dadka uu dakhligoodu ka yaryahey hal dooler oo ka mareykanka ah.

### Hordhac

Markii la asaasey Puntland sanadkii 1998dii waxaa jirey wax yar kaabayaal dhaqaale ah oo aan hurumarsaneyn maalgelin aan laheyn, mudadadii u dhaxeysey 1970kii- 1990 kii waxaa la sameeyey wadadda dheer ee laamiga oo dhererkeedu yahey 900km iskuna xidha Galkacyo, Bosaaso iyo Garoowe ilaa Oog (gobolka sool). Waddadani imminka waa lafdhabarta dhaqaalaha wadanka, waxay fududeysaa dhaqdhaqaaqa alaabada ganacsiga ee isaga gooshta min galbeed ilaa bari,iyo koonfur ilaa waqooyi. Wadadan iminka xaaladeedu waxey mareysaa meel halis ah kadib markii ay waydey dayactir is daba jooga ah taasoo uu diidey dagaalada sokeeye ee wadanka ka socdey muddadii burburka, waxayna u baahantahey in lagu dayactiro ugu yaraan kala badh dhaqaalaha wadanka, kaasoo loogu isticmaalayo dibu hagaajin iyo dib u kabis meelaha burburey.

Waddadan ka hor waxaa aad u liitey hannaanka waddooyinka isku xidha waddanka, maqnaanshaha waddo wanaagsan oo isku xidha wadanka waxey noqoneeysa arinta ugu wayn ee caqabadda ku ah dadka deggan tuulooyinka iyo dadka reer guuraaga ah. Sidaad la socotaana qaybtan kaabayaasha dhaqaaluhu waa qaybta ugu muhiimsan marka laga eego xagga wax soo saarka is la markaana salka u ah dhaqaalaha maamul goboleedka Puntland sidaa dartedeed kabayaahs dhaqaaluhu waxey u baahan tahey maalgelinta ugu badan taasoo lagu beegaayo meelahan:

- Suuqyo
- Xanaaneyta xoolaha
- Hurumarinta dekadaha
- Harumarinta hawlaha beeraha
- Iyo maaliyada

Maqnaashaha kabayaal dhaqaale oo xoog leh waxey keeneysaa xaalada degaanku in ay ahaato mid liidata, ayna adkaato in loo helo maalgelin xor ah iyo in ay keento in aanan lagu aamini Karin hanti ay geliyaan shirkadaha caalamiga ah ee maalgashada aduunyada.

Sannadkii 1999 waxaa la asaasey hay'ad maamusha kana shaqeysa dayactirka waddooyinka (NESHA), isla sanadkaa waxaa la asaasey hay'ad kale oo iyana maamusha biyaha, tamarta iyo khayraadka dabiiciga ah (psaweyn), asaaska hay'adahaasi waxa ahayd tallaabo hurumar u ah dayactirka iyo wax ka qabashada waddooyinka, gegooyinka diyaaradaha, biyaha iyo qashinka magaalooyinka.

- Balaarinta nisbada ardayda gasha dugsiyada sare in lagu hagaajo tababar tayada barayaasha, dhisme iyo dayac tirid dugsiyada reer miyiga.
- Xoolo dhaqatada reer miyiga la gaarsiiyo hannaan waxbarasho oo socoto ah oo raali gelin kara xoolo dhaqatada iyo reer miyiga labadaba.
- Xoojinta barnaamijka tababarada farsamada iyo xirfadaha gaar ah kuwa haweenka iyo dhalin yarada
- Ballaarinta jaamacadaha si ay u soo saaraan dad aqoon leh oo aad u tababaran oo daruuri ah.
- Taageero xoogga lagu koobo aqoonsiga waxbarashada aan toos iyo dadab midna ahayn.

Celcelsiga nolosha dadka reer Puntland waxaa lagu qiyaasaa 49 sano waana mid ka mid ah tan ugu hooseysa marka la barbar dhigo dunida kale.

Halka Puntland ay ka mid tahay kuwa ugu heer sareeya nisbada dhimashada hooyo iyo dhallaanka. Waa tan ugu saraysa marka loo eego dunida helid la'aanta biyo nadiif ah haddana waxaa cad in nadaafad xumida guud dilaaciso cudurada faafa sida : Tiifow, xundhur, duumo iyo shuban, tallaalka lixda cudur waa boqolkiiba 25, jadeecada boqolkiiba 60 ayaa la fuliyey, taana waxaa u sabab ah bulshada oo aan u baraarugsanayn khatarta cudurka gaar ahaan.bulshada miyiga ku nool. Isticmaalka gudniinka gabdhaha ayaa ah arrin dhibaato ku ah caafimaadka haweenka. Gudniinka gabdhuhu aad baa looga isticmaalaa miyiga, halkaas oo gabdhaha da'da lixda illaa sagaalka sano laga gudo. Laakiin xaalku waa iska badeley magaalooyinka. Taasna waxaa keenay baraarugsanaanta HIV/AIDS, waa cudur hadda soo baxay oo waxyeeladiisu tahay 1%.

Cudurada ugu badan waxaa ku jira Duumada, Neefta, Xundhurta, waana kuwa sababa kalabar dhimashada ilmaha. Kojiso (gaar ahaan murjuxa) iyo qaaxaduba waxa ay ka mid yihiin kuwa ugu horreeya ee sabab u ah dhimashada. Miciinsiga daaweyn daqameedka, gudniinka gabdhaha yar-yar iyo dilaaca jadeecada, fuuqbaxa, xundheerta, qoorgooyo ayaa abuura khatarta faya qabka bulshada. In kasta oo HIV/AIDSka aan weli la diiwaangelin, waxaa loo arki karaa in uu khatar weyn ku yahay bulshada, gaar ahaan dhalin-yarada.

Waxaa la dar-dar galiyay hannaanka caafimaadka ka dib markii la dhisay Wasaaradda Caafimaadka sanadii 1993dii, haseyeeshee wali waxa ay u baahan tahay barbaarinta awoodda si ay u gudato waajibka iyo ujeedooyinka loo idmay. Badiba dhakhaatiirta xirfadlayaasha ah 90% waxa ay ku sugan yihiin magaalooyin kooban (Tusale Boisaaso, Garoowe, Galkacayo). Dhammaan cusbitaalada gaarka iyo kuwa dadweynuhuba shan maagaaloo ayay ku yaalaan. Cusbitaalada qaarkood iyo tashiilaad kalaba ma ay shaqeeyaan. Tuulooyinka waxaa ka jira xarumaha hooyada, dhallaanka iyo baro caafimaad oo kaliya. Xataa magaalooyinka waa ay ku yar yihiin dakhaatiir xirfad wada lel. Inta badan waxaa dhacda cudura la xiriira wadnaha, kilyaha, sanbabada oo khatartoodu yar tahay oo loo aado gacanka Persian ama Kenya. Tayada adeegga xarumaha caafimaadka waa ay ka hooseeyaan heerka laga rabo.

Isticmaal xumida daawada yar ee la hayo ayaa sababtay hoos u dhaca tayada caafimaadka. Dakhaatiirtu waxa ay leeyihiin goobo caafimaad, hadana laga yaabee in ay maamulaan isbitaallada dadweynaha iyo wax-qabad caafimaad dadweyne.

- Dhibaato ka dhalatey nabaad guurka: waxaana sababey abaaraha is daba jooga ee ka dhaca deegaanada
- Dhibaato ka dhalatey shidida dhuxusha: waxaa keeney in aaney jirin tamar kale oo la raadiyey si ay u badasho shidashada dhuxusha, waxaa sii bunaadiyey heerka nolosha oo hooseeya, iyo abaaraha is daba jooga ah ayaa iguna sii kordhiyey dhibaatada dhuxulaysatada oo ah manta mida ugu daran ee haysata deegaanka puntland.

Qorshaha baahida waxqabad ee degaanku waxey u baahan tahey

- Iyadoo la hurumariyo hay'adda qaabilsan arrimahaa iyo kaabayaasha dhaqaalaha
- Wacyigelin dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta degaanka oo loo sameeyo dadka.
- Kor u qaadidda aqoonta shaqo iyo ta farsamaba dadka kawada shaqeeya gobolka.

Waxaa lagama maarmaan ah in la helo dad ka masuula ilaalinta degaanta siiba arriman soo socda:

- Ilaalinta ciida iyo biyaha
- Hurumarinta wax soo saarka iyo biyaha
- Sameynta qanuunka maamulka dhulka
- Joojinta dhuxul shidista dhirta

### 7.3.1 BURBURKA XAALADA NOLOLEED IYO KA TABAABUSHAHEEDA

Masiibooyinka dabiiciga ah ee soo foodsaara Puntland sida abaaraha is daba jooga ah, ayaa waxey keeneen in kala badh xoolihii noolaa ay ku lumeen, taasoo keentey in ay saameyn ku yeelato xaalada nololeed , marka laga hadlaayo xaga dhaqaalha lafdharta dhaqaalaha puntland waa xoolaha nool isla marahaantaa madaama oo dhaawac wayn gaadhey xoolihii waxaa hubal ah in dhaqaalihii iyo xaalda nololeed ee dadka wax wayn is ka bedeleen, ayna u baahan tahey in laga tabaabusheysto inta aaney iman abaar kale taasoo sida badan shantii sanaba mardhacda.

Maamulka masiibooyinka dabiiciga ah oo si wacan u shaqeeya waxey yareysaa khasaaraha ka imaan kara in ay bulshadu noqoto mid u nugul dhibaatooyin, taasina waxey ku iman kartaa in ay jirto nadaam wadashaqeyneed oo si buuxda isuga xidhan iyadoo xoogga la saarayo waxyaabahan:

- Xogta oo lawadaago
- Digniin goor hore inta aaney dhicin xaaladdaasi
- Tabta loo waajahayo dhibaatada (strategy)
- Wacyi gelinta iyo baraarujinta bulshada

Dawladuna waxey khariiradeyneysaa baaxadda hawshu inta ay tahey iyadoo usameyneysa nadaamka loo waajahayo, iyadoo raaceysa hanaanka siyaasadeed ee u degsan dawladda.

## FURAHA MUDNAANTA HORUMARKA ARRIMAHA QOYSKA IYO HAWEENKA

- ✓ Xoojinta sharciga iyo horumarinta hannaanka maxkamadaha ee horumarinaya xuquuqda haweenka iyo arrimaha qoyska;
- ✓ Kabidda caafimaadka, biyaha nadiifsan, nadaafad habboon oo u jaban haweenka iyo qoyskooda;
- ✓ Kor u qaadidda akhris/qoridda haweenka, dhalinyarada, ilmaha gar ahaanna tababarida xirfado suuq-gal ah iyo teknoolojiyad ku haboon.

*Saboolnimada iyo kormeerka yoolasha 2000 sano. Saboolnimada/kormeerka iyo falanqaynta yoolasha horumarinta 2000 sano;*

Yaraynta saboolnimada dhammayska ah, waxa ay qaylo dhaan u tahay, yoolasha qorshaha shanta sano ee Puntland ee Soomaaliya. Yoolasha horumarka waa kobcinta garsoorka, sinnaanta, nabadda iyo badbaadadda dowlad wanaag, hannaan nololeed fiican, fursado shaqo fiican, guud ahaan xaqiiqo ah, sahal agab u gaarid iyo dhawrista deegaanka. Intaa oo dhan ayaa xuddun u ah yaraynta saboolnimda iyo kor u qaadidda nolosha bulshada Puntland. Istaraatijiyadda lagu yarayn karo saboolnimada qaranka oo ay kaabaan yoolasha horumarka 2000 sano ayaa fure u ah yaraynta saboolnimada oo waarta.

Xilligii dhexe waxaa qaranka si debecsan ugu mintidayay koritaanka si joogto ah u socda, kaydinta agabka iyo bulshada saboolka ah oo loo abuuro fursado ay kaga qayb-galaan horumarka socda.

## TABTA YAREYNTA SABOONIMADA

Sida loo yarayn karo saboolnimada ka jirta DG Puntland waa laga dheehan karaa tabaha horumarka ee FYDP ee Puntland oo ay is kaabayaan R.D.F oo barbar socdana warqadda DG Puntland. Waxaa sahal u ah qorshaha horumarka DG Puntland nabadgalyo iyo badbaado.Tanina waxa ay abuuraysaa fursado dadku kaga qayb-galo horumarka iyo u sinnaanta qaybsiga miro dhalka, taas oo sii adkaynaysa badida.

Warbixin soo baxday 2001, ayaa sheegaysa in dalka Soomaaliya ku jiro kuwa ugu hooseeya ee dalalka soo koraya ee dakhliga qofkii uu yahay $200 sannadkii oo dhan. In kasta dakhliga qofka uu xoogaa kor u kacay, haddana bulshadeena badankood waxaa haysta in aanay u sugnaan si cunto ay ku helaan, waxaana ku jira xoolo dhaqatada, bulshada ku nool tuulooyinka, xoolo/beeralay, kalluumaysato iyo bulshooyin ku nool magaalada.

Xaaladda nafaqo darrada daran ee Soomaliya ka jirta waxaa lagu qiyaasay 17% boqolkiiba. Akhris/qoris la'aanta dadka waaweyn hoos ayay uga dhacday 17% boqolkiiba muddadii dagaalka sokeeye ka dambeysay. Ilmaha dugsiyada halkay horay uga ahaayeen 18% boqolkiiba waxa ay hoos ugu dhaceen 13.6% boqolkiiba sanadaddii 1999 iyo 2000, iyo dugsi ka tagid heer aad u sareeya.

### 7.4.2 Soo jeedita waxyaabaha lafilaayo in ay soo baxaan ee qorsha shanta sano

- Dhammeynta baadhitaanka tamarta iyo soo saarista khariiradda tamarta ee waddanka
- Hurumarinta hannaanka helitaan tamar kale sida saliid iyo gaas
- Hay'daha ku shaqada leh oo aqoontoodu kor u kacda lana barto.
- Siyaasadda tamarta oo la sameeyo
- Shidashada dhuxusha oo hoos u dhacda

## 7.5 GEGIYOOYINKA DIYAARADA IYO DEKEDAHA

dadka reer puntland in ta badan waxey safarada u isticmaalaan baabuurta, magaalooyinka 68% ayaa isticmaala baabuurta, taasina waxey xaqiijineysaa in ay tahey arrinta ugu way ee ay u isticmaalaan safarada, dadka degan tuulooyinka iyo reer guuraaga 34% ayey u isticmaalaan farradooda baabuur, marka laga reebo calawla iyo qandala oo laga gaadhi karo xaga badda. Taasina waxey xaqiijineysa in ay tahey muhiimada kowaad wadooyinka, dhibaatada ugu wayna ee haysatana waa dhaqaala la'aan iyo qalab la'aan, wadooyinka siman (banaanka) ee la mari karo waa 65%. Dhammaan waddooyinka Puntland in ta kale waxey ku yaalan dhul buuraleyda ah oo ay adag tahey in lagaadho.

Dakedda keliya ee ku taal Puntland waa dekedda Boosaaso oo iyana iyadoo qabyo ay dawladii dhacdey, malaha wax qalab oo ka caawiya in ay kasoo degaan alaabta aad culculus, inta ay hoos qodantahey (deep) ma aha mid ay soo gelikaraan maraakiibta qaada shixnaddaha aad u culus, taasina waxey keentay in kirada lagu keeno shixnadahaas ay aad qaalli u tahey.

Gagida diyaaradaha ee laamiga ah ee ku taalo Puntland waa gegida diyaaradaha ee Galkacyo, waxana la dhisey intii aaney burburin dawladii hore waa la qalabeeyey hase ahaatee qalabkaasi wuxuu lumey waqtigii dagaaladii sokeeye marka laga reebo wadiidii diyaaraduhu ku ordaan (runway) oo iyaduna u baahan in waxlaga qabto.
Dawlada hoose ayaa ka masuul wadooyinka magaalooyinka waaweyn gudahooda ku yaala laakiin maheystaan dhaqaale ay wax kaga qabtaan wadooyinka aan soo sheegney.
Puntland malaha gegi caalamiya laakiin waxaa jira saddex gegiyood oo loo isticmaalo diyaaradaha yaryari.
Qorshahani waxuu xooga saarayaa sidii loo horumarin lahaa asaaskana looga bilaabi lahaa dhammaan kaabayaasha dhaqaalha ee wadanka, iyadoo loogu horeysiinayo kuwa ku yaal magaalooyinka waaweyn iyo kuwa isku xidha magaalooyinka waaweyn iyo meelha fog fog ee aan laheyn wadooyin si fudud lagu gaadhi karo (xeebaha).
Madaxda wadanku waxey soo jeedisey in la sameeyo kaabayaasha dhaqaale ee is ku xidha meelaha ay degaan dadka reer guuraaga ah iyo tuulooyinka ku xidhanba si ay u sahlanaato in ay keenaan wax soosaarkooda magaalooyinka waaweyn.

### 7.5.1 Soo jeedinta waxyaabaha la filayo in la gaadho

- Helitaanka kaabayaal dhaqaale oo hurumarsan
- Joogteyn Dhaqaale ururin, qoondeyn, fulin, iyo ku maamulid kaabayaasha dhaqaale ee wadanka.

Waxaa hubaal ah in aaney jirin awood wax laga qabto hawlaha guud oo ku filan hawsha abaaxaddaa leh, siiba meelaha aad ka u fog fog sida gobalka Bari iyo xeebaha galbeedka. Kaabayaasha dhaqaaluhu in ay liitaan waxaa hubaal ah in dhaqaaluhuna liidanayo.
Qorsha shanta sano ee puntland waxuu xooga saarayaa hurumarinta kaabayaasha dhaqaalaha sida biyaha, qashinka, wadooyinka, gegooyinka diyaaradaha, tamarta, isgaarsiinta iwm. Waxaa kaloo la joogteynayaa dibdhiska hawlaha adeega bulshad sida dhameystirka dekadda boossaso IWM.

## 7.2 BIYAHA IYO QASHINKA

qorshaha waqtiga dheer ee horumarineed ee dhinaca biya iyo nadaafadu waa: xaqiijinta dad reer magaal ah oo awood u leh in ay mareeyaan xaladahooda nadafadeed, isla markaana hela biyo nadiifa taasoo ay xaq u leeyihiin, biyaha nadiifta waxey ka qayb qaataan caafimaad tayo leh, iyo hoos u dhigidda saboolnimada.
Waxey kala xidhiidhaa MDG : in marka lagaadho 2015 ka dad adduunka kala badh ay awood uyaashaan in ay helaan biyo nadiif ah iyo nadaafadda asaasiga ah.

Meelaha ugu waaweyn ee biyaha puntland ka heshaa waa biyaha roobka, kaydadka godadka, ilaha, iyo durdurada, awooda helitaanka biyaha loo baahan yahey waa liidataa, 26% ayaa lagu qiyaasaa iney helaan biyo nadiif ah dadka magaalooyinka degen, reer guuraaga iyo dadka tuulooyinkana waxaa lau qiyasaa 14.5%,sidoo kale dadka aan degeneyn magaalooyinka 70% ma helaan in ay isticmaalaan musqulo. Nadaafad laaanta iyo qashinka oo aan la iska asturin waa dhibaatada ugu way nee haysata degaanka.

### 7.2.1 soo jeedinta waxyaabaha la filaayo in ay yimaadaan ee qorshaha shanta sano

- Helitaan biyo nadiif ah oo ku filan dadka iyo xoolaha iyo waliba qashinka magaalooyinka oo loo helo qorshe lagu maamulo.
- Abuuritaan shaqaale tiro iyo tayaba leh
- Ka wada qaybgal rag iyo dumarba hannaanka loo yaqaanno shacabeynta adeegyada.

### 7.2.2 soo jeedin ta waxaa yaaba la rabo in ka soo baxan qorsha shanta san.

- In ay helaan biyo nadiif ah iyo nadaafad in ka badan 100,000 oo qof oo reer tuulo iyo reer guuraa isugu jira.
- Soo saaritaanka nadaafad ku filan inka badan 190,000 oo reer tuulo iyo reer magaalba leh
- Abuuritaanka siyaasad cad oo lagu maamulo biyaha dalka
- Psewyn oo la gaadhsiiyo heerkii ay ku hananlaheyd hawlaha biyaha

### 7.3.2 Ilaalinta degaaanka

Qorsha waqtiga dheer ee xagga horumarinta waa sidan: ilaalinta khayraadka dabiiciga ah iyo guud ahaanba deegaanka, lana joogteeyo tayaynta iyo hagaajinta degaanka.
-MDG waxay la xidhiidhaa : in la xaqiijiyo cidkastaa degaankeedu inuu yahey deegaan ilaashan, is lamar ahaan taana lasoo nooleeyo ama lasoo celiyo degaanadii waxyeeladu gaadhey waxyaabaha waxyeeleya degaanka waa ay farabadan yihiin waxaan soo qaadaneynaa kuwa aan is leenahey waa ugu xoog badan yihiin.

### 7,5.2 Soo jeedinta waxyaabaha ka soo bixikara qorshaha shanta sano

- Qorshaha NESHA ee kor uqaadista aqoonta shaqaalaha iyo qalabka oo hurumara awoodna u yeesha in uu fuliyo shaqooyinka u yaala.
- Kawada qayb galka hawlaha kaabayaash dhaqaalaha ee shirkada gaarka ah iyo qaybaha maalgelimaha debedda si hufaan ah, isla markaana qiimeysan.

### 7.6 Guryeynta

*Himilada horumarineed ee fog*: In ay u suurta gasho muwaadiniinta Puntland in ay ku negaadaan dhulkooda kuna tarmaan iyadoo laga taageerayo baahidooda kala duwan ee la xiriirta degaamaynta leh jawi nabadeed oo ay awoodi karaan.

*Yoolka horumarineed ee labada kun*: In lagu guulaysto 2020 hagaajinta nolosha ugu yaraan 100 maljuun oo aan hoy lahayn.

Xogta laga hayo guryha Puntland waa mid xaddadan. Waxaa la filayaa in xaaldda guryuha ay isku mid tahay soomaaliya oo dhan. Dadka soomaaliyeed badidoodu waxay ku noolyihiin dhismayaal ku meel gaar ah, gaar haan kuw ku nool tuulooyinka. 6% oo keliya ee dadka tuulooyinka deggan iyo reerguuraaga waxay ku noolyihiin guryo rasmi ah halka ay 60% dadka reermagaalka ahi ay ku noolyihiin guryo rasmi ah. Shanmeelood oo hal meel guryaha reermagaalka iyo kala bar guryaha tuulooyinka iyo miyiga waxay ka kooban yihiin hal qol. Guryha magaalooyinka waxaa xaaladdooda uga sii daray qulqulka qaxootiga imanaya magaalooyinka iyo dadak ka soo guuraya tuulooyonka.

Guryeyntu waxay hoos timaaddaa Wasaaradda Hawlaha Guud. Ilaa hadda wax qorshe ah oo la xiriira guryaha lama dejin. Waxaa cadaadis ku haya magaalooyinka dadka ka soo barakacay koonfurta Soomaaliya iyo qaxootiga imanaya ka dib burburkii dawaladdi dhexe 1991 taasoo sababtay guryo la'aan iyo adeeg la'aan. Waxaa habboon in dadka la dejiyo magaalooyinka ku yaal xeebaha halkaas oo uu ka jiro yididiilo horumar dhaqaale. Qorsha shanta sano wuxuu xoogga saarayaa in la aasaaso hay'ad dawli ah oo ku shaqo leh dhisidda guryaha shaqaalaha dawladda iyo dadka danyarta ah.

7.6.1 *Soojeedin waxa la filayo in ay ka soo baxaan qorshaha shanta sano*

- Nabadgelyo iyo amman
- Ku noolaansho xaalad wanaagsan

7.6.2 *Soojeedin waxa la filayo in ay ka dhashaan qorshaha shanta sano*

- Daah ka qaadidda siyaasadda qaran ee guryanta
- Hagaajinta xirfadda dhismaha oo korodhay
- Habaynta barnaamijka guryaha bulshada
- Horumarinta qorshaha magaalooyinka

### 7.7 *Xogta iyo War-isgaarsiinta*

*Himilada horumarineed ee fog:* Xaqiijinta caalamiyeynta, tayeynta, awooditaanka iyo isu dheellitirka goboleed ee isgaarsiinta iyo adeegga si loo dardargeliyo horumarinta dhaqandhaale, hagaajinta dawlad wanaagga iyo wax wada qabsiga dunida inteeda kale.

*Yoolka horumarineed ee labada kun*: Iyadoo lala kaashanayo hay'adaha lahaanshaha gaarka ah si loo helo faa'iidada aqoonta farsamada casriga ah, gaar ahaan xogta iyo isgaarsiinta

### 7.3.2 Soo jeedita waxyaabaha lafilaayo in la helo ee qorshaha shanta sano

- Degaan ilaashan isla marahaantaana qiimeysan
- Kor u kac ku yimaadda sinnaanta loo siman yahey degaanka

### 7.3.2 Waxyaabaha kasoo bixi kara soo jeedinta qorsha shanta sano

- Isku dubarididda dhamman hay'adaha ilaaliya degaanka
- Ilaalinta kallumeysiga sharci darrada ee badda
- Dhul la leeyahey oo ilaashan marka ay haboonaato
- Maamulka qorshaha masiibooyinka dabiiciga ah oo shaqeynaya.

## 7.4 TAMARTA

Qorshaha horumarineed ee waqtiga dheer: hurumarinta iyo kor uqaadista shaqooyinka tamarta lana xaqiijiyo awood lagu hanan karo nabadgelyada tamartaas.

Tamarta ugu badan ee ay isticmaalaan dadka reer puntland waa qoryaha la shito iyo dhuxusha, awooda ay uleeyihiin in ay helaan koronto waa mid kooban marka laga hadlaayo tuulooyinka iyo dadka reer guuraaga ah, ku dhawaad 65% waxey qoysasku u isticmaalaan cunta karsashada waa qoryaha la shito, taasoo inta badan aan laga siin wax lacag ah, 39% kalena waxey isticmaalaan dhuxusha.
Marka laga hadlayo dadka degan magaalooyinka waaweyn in kaban 74% ayaa isticmaasha dhidasha dhuxusha, tamarta korantada inta badan waxaa loo isticmaalaa, arimaha ganacsiga, warshadaha, iyo soosaarista biyaha, tamarta guud ee waddanka 40% in ka badan baa loo isticmaalaa dhalinta korantada.
Shidashada xooggan ee dhuxusha waa arrinta ugu wayn ee keeni karta nabaad guurka, haddii arintani sii socotana waxey keeneysaa in uu waddanku noqdo mid nabaad guura, taasoo ay sii dedejineyso abaaraha is dabajooga ah ee wadanka ka dhaca, talaabooyinka loo baahanyahey in laqaado si loo yareeyo arrintaas waa iyadoo la helo tamar kale oo loo isticmaalo cunta karinta taasina waxey qaadaneysaa waqti dheer, waxeyna ubaahan tahey dhaqaale lagu maalgeliyo.
Sidaadraadeed qorshaha shanta sano waxuu xooga saarayaa dhismaha iyo koruqaadis aqoonta shaqaalaha hayadda tamarta iyo khayraadka dabiiciga ah, maadaama oo ay iyagu masuul ka yihiin tamarta iyo khayraadka dabiiciga ah. Qorshaha shanta sano wuxuu doonayaa:

- Xal u helidda Maalgelin yaraanta hurumarinta tamarta.
- Hurumarinta hay'adda saliida (puntland oil authority) tasoo hadda la abuurey si ay gudato hawsheeda
- Dardargelinta iyo diyaarinta heshiisyadii saliidda sidii loo soo saari lahaa
- Tababarida khubaridii macdanta (geologist) iyo farsamayaqaanadii lahaa aqoonta farsamo ee macdanta
- Ururinta iyo akhrinta xogta laga soo ururiyo minaaradaha cabira dabaysha si loo sameeyo hab looga faa'iideysto tamarta dabeysha.

### 7.4.1 Soo jeedista waxyaabaha la filaayo in ay yimaadaan

- Sameysanka asaaska tamarta
- Xaqiijinta nabadgelyada tamarta